

Ka Jaahilbax Aqoonta Dareenka/Dabeecadda Qofka: Isticmaal Dareemada Wajigu Muujiyo

Dareemada wajigu muujiyaa waxey caruurta ka caawiyaan iney fahmaan dareenkooda iyo kuwa dadka kaleba. Waa muhiim in la barro caruurta kalmadaha loo adeegsado dareemadan si ay u gudbin karaan dareenka ay qabaan marka ay la soo fool yeelato xaalad dareenkeedu adag yahey. Tani waxa kale oo ay ilmaha ka caawineysaa in uu dareenkiisa ku meeleyo weedho. Warqadan posters-ka ah ee halkan la soocaa waxa loo adeegsan karaa siyaabo kala duwan si looga caawiyu caruurta inay bartaan xirfadaha dad ladhaqanka iyo dareenka qofka marka waliba lagu ag isticmaalo weedhaha macneeya dareemada qofka iyo ka sheekooyinka aqoonta aasaasiga u ah dareenka aadamaha. Warqada halkan ku lifaaqani waa waraaq tabeelo ah (poster) oo ay ku sawiranyihiin caruur wajiyadoodu gudbinayaan dareenno kala duwan.

- ▶ U isticmaal wajiyada sawiradan ee dareenka xambaarsan inaad ilmahaaga kala hadashid, u kala tilmaamtid, una qeexdid dareemo kala duwan oo adiga ama ilmahaaguba sidan oo kale aad wakhtiyo dareenteen.
- ▶ Sawiradan wajiyada dareenka waxaa loo isticmaali karaa nidaam lagu cabirro dareenka. Sawirada dareenku waxey noqon karaan qaar ay caruurta kugu la socodsiiyaan dareenkoodu hadba sida uu yahey maalintii oo dhan.
- ▶ Bar caruurta kalmado cusub oo dareen. Ku bilow kalmado dareen oo fudud, oo u gudub kadibna qaar adag sida; dareenada israaca amaba isu cakiska ah; dareenka “togan/faraxadda leh” iyo ka taban/madluumka kaa dhiga.
- ▶ U sharax ilmaha sida ay dadku ku garan karaan sida aad dareemaysid iyaga oo eegaya dareenka wajigaagu gudbinayo. Kala hadal ilmaha sida loo kala sooci karo dareennada kala duwan iyadoo qofka, indhihiisa, afkiisa, ama sida iyo qaabka qofka uu jidhkiisu u joojiyo ama u dhiganyahey la eegayao. Isticmaal dareennada wajiyeed ee kala duwan si aad u tusdid ilmaha uguna sharaxdid waxey kala yihiin iyo dareennada ay gudbiyaan.

Sameyso tabeeladaada (poster):

Ashyaada aad u baahantahey:

- ▶ Tabeelo (poster) aad nuqul ka sameysatid (eeg lifaaqan)
- ▶ Kamarad
- ▶ Aalad marka aad sawirka qaadid kuu daabici karta
- ▶ Caruur dareenno kala duwan ku gudbin kara wajigooda
- ▶ Wax kuu xabkeyn kara sawirada

Hawlgalka:

- ▶ Falanqee sida ay dadku wajigaaga uuga akhrisan karaan dareenkaaga. Ka hadal sida loo kala sheegi karo dareemada kala duwan iyada oo la eegayo indhaha, afka ama qaabka qofku u dhigo ama u joojiyo jidhkiisa.
- ▶ Ka qaad hal sawir dareenkiiba.
- ▶ Daabaco sawirada oo ku dhaji meelaha banaan ee tabeeladan (poster-kan) nuqulka ah.
- ▶ Marka ilmuhu barto turjumaadda iyo magacaabista dareennada kala duwan ee ay wajiyadni gudbinayaan, uu sheegi karana dareenkiisa, ku kordhi sawiro kale oo muujinaya dareenno kale oo cusub oo aad bartid ilmaha.
- ▶ Bar dareeno isu dheelitiran sida; dareenka “togan/mabsuud” iyo ka taban/aan mabsuud aheyn.



Maangad



Khasow



Kali



Murugo



Cadhó



Sakati

Maanta sidan ayaan dareemayaa!



Farxad



Jaceyi



Cabsi



Isu bog

Maangad	Khasow	Kali	Murugo
Cadhoo	Maanta sidan ayaan dareemayaa!		Sakati
Farxad	Jaceyl	Cabsi	Isu bog